

Waa maxay khalkhalka ootismaha? (ASF)

ASF waa khalkhal ku yimaada korriinka neerfaha. Hoos waxaa ku qoran tusaalayaal muujinaya habdhaqannada ugu badan ee lagu arki karo dadka ASF qaba.

Xiriirka bulshada iyo dhexgalka bulshada




Waxay u ekaan karaan kuwo ku sugan duni u gaar ah

- In xaddidan ayay dadka indhaha ka firin karaan ama kamaba fiiryaan
- Waxaa dhici karta in aysan soo jeesan marka magacooda lagu dhawaaqo



Waxay u baahan yihiin in laga caawiyo sidii ay dadka kale wadashaqayn ula yeelan lahaayeen

- Waxay doorbidi karaan in ay keligood ahaadaan
- Waxaa laga yaabaa in ay doonayaan in ay wax ka qaybqaataan, laakiin aanay aqoon sidii ay uga qaybqaadan lahaayeen
- Waxaa ku adkaan karta in ay dad is bartaan oo ay xiriirkooda sii xajiyaan
- Waxay dadka ula xiriiri karaan hab caadiga ka duwan




Waxay u baahan yihiin in laga caawiyo la hadalka dadka

- Waxaa laga yabaa in ay luuqaddu ka soo daahday ama ay ku yar tahay
- Waxaa laga yaabaa in uu ereyada u fahmo si xarfi ah
- Waxaa laga yaabaa in uu ereyo badan yaqaanno, laakiin ay ku adag tahay sidii uu bulshada dhexdeeda luuqadda ugu isticmaali lahaa



Waxaa ku adkaan karta in ay mawduuca ku ekaadaan/ama ay mawduuca beddelaan

- Waxaa ku adkaan kartaa in ay wadahal billaabaan, sii wadaan ama soo gabagabeeyaan
- Waxaa ku adkaan karta in ay hal mawduuc ku ekaadaan




Waxaa ku adkaan karta in ay «akhriyaan»/fasirtaan farriimaha ama xaaladaha bulsho

- Waxaa ku adkaan karta in ay fahmaan luuqadda jirka, calaamadaha wejiga iyo qaabdhaca hadalka
- Waxaa laga yaabaa in ay u baahan yihiin in laga caawiyo sidii ay u fahmi lahaayeen waxyaalaha habboon xaaladaha kala duwan

Waa maxay khalkhalka ootismaha? (ASF)

ASF waa khalkhal ku yimaada korriinka neerfaha. Hoos waxaa ku qoran tusaalayaal muujinaya habdhaqannada ugu badan ee lagu arki karo dadka ASF qaba.

Habdhaqan, xiise iyo firfircooni



Habdhaqan soo noqnoqda

- Isla falkii ayuu soo celcelin karaa marar badan, tusaale ahaan in uu alaab saf u dhigo ama in uu isku hal filin firsado




Dhaqdhaqaaq soo noqnoqonaya iyo luuqaad aan caadi ahayn

- Hadal lagu celceliyo (ereyo iyo jumlado ayay ku celceliyaan)
- Erey cusub/luuqaad iyaga u gaar ah
- Gacmaha ayuu taagaa, is wareejiyaa ama horay iyo gadaal u socdaa



Wuxuu jecel yahay qaab iyo nidaam

- Wuu necbaan karaa lamafilaanka, isbeddelkana aad buu u dhibsan karaa ha ahaado mid yar ama mid weyne
- Wuxuu u baahan karaa in la caawiyo si uu wax cusub isugu dayo



Waxyaalaha ay xiiseeyaan waa kooban yihiin

- Hal mawduuc ayay aad iyo aad u xiisayn karaan (tusaale ahaan tareen)
- Waxaa laga yaabaa in ay xiiseeyaan wax aan caadi ahayn (tusaale xabagta wax layskula dhejiyo)
- Mawduuc ay had iyo jeer ka fikiraan/hadlaan ayay si caadiga ka baxsan oo aad ah u xiisayn karaan

Marna xasaasi aad ah, marna aan xasaasiba ahayn

- Falcelin aan caadi ahayn ka samayn karaan waxa ay arkaan, maqlaan, uriyaan, taabtaan ama dhadhamiyaan iwm.
- Falcelin caadiga ka duwan ayay ka samayn karaan xanuunka



Dhibaatooyinka caadiga ah ee la socda

ASF waa khalkhal ku yimaada korriinka neerfaha. Hoos waxaa ku qoran tusaalayaal muujinaya habdhaqannada ugu badan ee lagu arki karo dadka ASF qaba.

Dhibaato la xiriirta xaddidaadda firfircoonida

- Aad u duulduul badan
- Aan firfircoonayn



Hurdo xumo

- Dhawr jeer ayuu soo kici karaa habeenkii
- Waxaa laga yaabaa in uusan hurdo badan u baahnayn



Dhibaato ah in dareen ahaan la xaddido



Dhibaato xagga cuntada ah

- Wuxuu dhubsan karaa midabka iyo qaabka cuntada
- Wuxuu dhubsan karaa marka cuntada laysku daro

